

Warbixinta koronada

Cudurka feyriska koronaha (COVID-19) waa cudur afka iyo sanku hawomareenka lagu qaado. Cudurku wuxuu ku faafaa neefta soo baxeysa dhibco yaryar oo la socda kuwaa oo u gudba dadka u dhoow iyagoo aan la arkeyn. Markaad qeeylineeysid, heeseeysid, qufaceeysid iyo hindhiseeyso cudurka meel dheer ayuu ku faafi karaa.

Cudurka waxaad qaadi kartaa adigoo astaamaha kugu bilaaban, mar qofka jiraday uusan ogeyn inuu cudurka qaaday.

Cudurka wuxuu noqon karaa mid aad u fudud, sida diif, dhuun xanuun, urka iyo dhadhanka oo isbedela, daal ama qufac.

Cudurku wuxuu qatar u yahay dadka xaaladoodu liidato iyo dadka waaweyn. Astamaha yar oo cudurka ama astaamo laawe jiran wexeey u gudbin karaan cudurka kuwa xaaladoodu liidato iyo dadka waaweyn wuxuuna ku noqdaa nooc cudur halis u ah iyaga.

Cudurka isagaa iska baxa. hadii astaamaha cudurku adagyihiin, waxaa loo baahanyahay daryeel caafimaad, ilaa cudurka laga caafimaadaayo.

U Jirashada cudurka qofna malaha eediisa. Qofka jiraday waa inuu ka ilaaliyaa dadka kale ineey jiradaan intuu isagu ka caafimaadaayo.

Sababtoo ah qofka jiraday ma oga isla markaas, inuu dadka kale ku daaran karo, dadkii qofka jiraday uu la kulmayna waxaa lagu amrayaa karantiil, sababtoo ah iyaga waxaa laga yaabaa ineey cudur soo socda wadaan. Qofka jiraday isaga waa la go'dominayaa.

Waa maxay karantiil?

Karantiil micnihiisu waa ka fogaanshaha dadka kale la kulankooda. ujeedadana waa ka hortaga dadka kale ineey jiradaan, sababtoo ah cudurka waad faafin kartaa adiga oo aan ogeyn. Qofka, la kulmay qof jiran waxaa laga yaabaa isaguna inuu jirado, waxaa la gelinaayaa karantiil.

Kelada ayaa ku siineysa mushaarka kaa dhumay intaad karantiilka ku jirtay.

Meequu soconayaa karantiilka?

Karantiilka dhererkiisa waa 10-21 maalmood wexeey ku xiranatahy, sida qofka jiraday loola kulmay. Karantiilka ujeedadiisa waa ka hortaga dadka kale ineey jiradaan, waqtiga qofka uusan ogeeyn inuu jiranyahay iyo in kale.

Ma la baarayaa kuwa karantiilka ku jira?

Karantiilka kuwa ku jira lama baarayo, hadii eeysan laheeyn astaamaha cudurka. Baaritaanka si fudud looma helo cudurka intuusan astaamihiisa bilaaban.

Waa maxay go'doominta?

Qofka, jiraday waxaa la gelinayaa go'doon, si dadka kale eeysan u jiran. Go'doomintu wexeey la mid tahay karantiilka, laakiin dhererkiisu wuxuu ku xiranyahay cudurka astaamihiisa.

Sideen u caawin karaa ama uga hortegi karaa cudurka faafidiisa?

Hadii aad leedahay astaamaha cudurka, sida diif, qufac, dhuun xanuun, dhadhanka iyo urka oo isbedela, qandho, daal xad dhaafa, ha la kulmin dadka kale, ha aadin shaqada ama iskuul, aad baaritaanka koronaha.

Hadii baaritaankaada koronaha jawaabtiisu tahay negative, waa inaad marka labaadka ee aad jirato baaritaan aadaa. Baaritaanka wuxuu sheegaaya keliya inuu markaas cudurka ku hayo.

Maski, qarinaaya sanko iyo afka wuxuu yareeynayaa faafida cudurka. Isticmaal maski meelaha dadweeynaha, ee dadka badan joogaan. Isticmaal maski tusaale basaska, taksiyada, iyo dukaamada.

Ka fogoow dadka kale meelaha dadweeynaha masaafada amaanka u jirso 2m.

Markaad qufaceeysid ama hindhiseeyso ku dabool afkaaga iyo indhahaaga faseeleetiga sanko ama xusulkaaga, ha ku quficin gacantaada.

Hadii karantiil lagu geliyey ama go'doomin, ku dhaqan tilmaamaha. Ha la kulmin dadka kale. Ha aadin shaqo ama iskuul.

Hadii aad u baahato inaad baaritaan korona tagtid, wac 03 311 65333